



WAXBARASHADA MARAYKANKA

Maraykanka dhexdiisa, waxbarashadu waxay dyaar utahay dhamaan caruurta, ayadoon laga fiirinayn awoodooda, jinsigooda, da'dooda, asalkooda, diintooda, dareenkooda galmo, ama nooca bulsho ee ay katirsan yihiin. Iskuulada dawlada waa lacag la'aan, waxaana jira sharciyo iyo xeerar quseeya iskuulada dawlada. Iskuulku wuxu qasab kuyahay caruurta jirta da' gaar ah oo kabilaabanaysa yaraantooda ilaa intay labaatanka kahooseeyaan. Da'da rasmiga ah ee iskuulka qasabka kuyahay waxaa lagu go'aamiyaa sharciga gobalkasta uyaala. Iskuuladu waxay filayaan in waalidku qayb ka ahaado wax barista caruurtooda ayagoo xaajijinaaya inay iskuulka yimaadaan ayna kacaawiyaan meelo kala duwan.

CARUURTA IYO DHALIN YARADA

Iskuulada dawlada waxaa laga helaa wadankoo dhan ayagoo lacag la'aan ah. Sida uu sharcigu qabo, iskuulada dawlada wax shuqul ah kuma lahan diimaha. Iskuulada gaarka loo leeyahay ayaa sidoo kale laga helaa inta badan meelaha, qaarkoodna waa kuwo diimeed. Iskuulada gaarka looleeyahay waxay ardayda kaqaadaan lacag, taasoo noqon karta mid qaali ah.

Waxaa jira afar darajo oo waxbarasho ah. Caruurta isku fasalka ah da'dooda way kala duwanaa kartaa, inkastoo inta badan ardayda ay 1 ilaa 2 sano ay kala wayn yihiin. Iskuulada dawlada, wiilasha iyo gabdhaha way isla dhigtaan fasalada.

Ardayda haysata shahaadooyinka dugsiyada sare iyo darajooyin aqooneed oo saraysa waxay waxbarashadooda kasii wataan kuleejka ama jaamacada, laakiin waxbarashada jaamaca maaha bilaash. Tababarada dugsiya sare kadib ayaa sidoo kale laheli karaa wayna karaqiisan yihiin kuleejyada iyo jaamacadaha.

Iskuulada Dad Waynaha



CARUURTA IYO DHALIN YARADA

SADEXDA HEER EE WAXBARASHADA

Iskuulka kahor. Heerkaan waxaa dhigta caruurta 3 ilaa 5 sano jirka ah. Sharcigu maqasbaayo.

Dugsiga hoose. Heerkaan wuxuu kabilowdaa Kindergarten (da'da 5 sano ah) wuxuuna si socdaa ilaa fasalka shanad ama lixaad (da'da12).

Dugsiga dhexe. Heerkaan waxaa kujira laga bilaabo fasalka lixaad ama todobaad ilaa fasalka sideedaad ama sagaalaad, ee caruurta da'doodu tahay 12 ilaa 14.

Dugsiga sare. Heerkaan waxaa kujira inta badan laga bilaabo fasalka sagaalaad ama tobnaad ilaa fasalka toban iyo labaad, waxaa dhigta caruurta da'doodu tahay 14 ilaa 18. Ardayda uuxiya shuruudaha iskuulka waxay helaan shahaadada dugsiga sare.

DADKA WAAWAYN



PHOTO | E. HOCKSTEIN

Ameerikaanku waxay aaminsanyihiin in uusan qofku kawaynaan kana yaraan inuu wax cusub barto. Waxaa jira fursado waxbarasho oo badan ayna helikaraan dadka waawayn iyo dadka yaryar ee qaan gaarka ah, laakiin qaxootiyadu waa inay kala doortaan xarashka iyo madaxa kudhaxeeya inay shaqeeyaan iyo inay waxbartaan. Waxbarashadu waxay kuusahlaysaa inaad mustaqbalka shaqo lacag badan hesho, laakiin qaxootiyadu waxay ubaahan yihiin inay ila markaba shaqeeyaan si ay utaageeraan naftooda iyo tan qoyskooda, waxbarashada dadka waawayn ee Maraykankana waxay noqon kartaa mid qaali ah. Dad badan oo qaxooti ah, dookhooda ugu wanaagsan waa inay shaqeeyaan maalinta oo dhan iskuulkana dhigtaa saacado kooban.

Deegaanada inta badan waxay leeyihiin waxbarasho noocyo kala duwan oo loogu talagalay dadka waawayn ayna kujiraan:

- Casharada luuqada Ingiriisiga iyo aqoonta
- Koorsooyin tababareed sida kumbuyuutarka, luuqadaha shisheeye, iyo xirfadaha xoghaynta
- Casharada shahaadada Hormarka Aqoonta Guud (GED) ee loogu talagalay dadka waawayn kuwaasoo aan lahayn shahaadada dugsiga sare

Cultural Orientation Resource Exchange

8719 Colesville Road, 3rd Floor • Silver Spring, MD 20910

For more information, visit the CORE Resettlement Navigator website at corenav.org.



The contents of this fact sheet were developed under an agreement financed by the Bureau of Population, Refugees, and Migration, United States Department of State, but do not necessarily represent the policy of that agency and should not assume endorsement by the Federal Government. **This material is in the public domain and may be reproduced.**

- Iskuulada fasaxyada iyo farsamada
- Kuleejyada bulshada (caadiyan barnaamijyo 2 sano ah)
- Kuleejyada ama jaamacadaha (caadiyan barnaamijyo 4 sano ah)
- Iskuulada waxbarashada sare ee bixiya shahaadooyinka labaad ee jaamacada ee maadooyin kaladuwan ah

Qiimaha fasladaan, iskuuladaan, iyo kuleejyadaan aad ayay ukala duwan yihiin. Iskuulada inta badan iyo kuleejyadu waxay bixiyaan adeegyo dhaqaale ayna siiyaan ardayda ubaahan.

FAHANKA DHAQANKA

Iskuulada Maraykanku waxay inta badan leeyihiin deegaan laqabsi fiican oo iyo isdhexgalka kuwacan, marka loo fiirsho casharada iyo qaababka wax loobaro wadamada kale. Waxaa sidoo kale qiima badan lasiiyaa fikirka dhabta ah iyo dadaalka qofka. Wada shaqayntu waa muhiim, laakiin ardayda waxaa inta badan lagu qiimeeyaa guulaha ay keenaan.

Waxaa jira qaabab badan oo waalidku kucaawin karan kuna taageeri karaan caruurtooda xataa hadaysan sifiican ugu hadli karin Ingiriisiga. Halkaan waxaad kahelaysaa qaababka qaar ay waalidiinta qaxootiga ah uga qayb qaadan karaan axbarida caruurtooda:

- Baar in iskuulku bixiyo dalxiis ay caruurta aadaan ama casharada xiliga xagaaga kahor intaan iskuulka lafurin.
- Waydii cunugaaga waxuu kasoo bartay iskuulka maalintaas.
- Waydii cunugaaga waxa loosoo siiyay shaqo guri ama fiiri buugooda layliga ama boorsadooda shaqada guriga.
- Kaqabgal casharada ESL, hadii laga bixiyo, iskkulka cunugaaga.
- Kaqayb gal kulanka macalimiinta iyo waalidka.
- Kacaawi nashaadaadka kabaxsan manhajka sida kooxda ciyaraha ee iskuuka ama kooxda farx=shaxanka.
- Tabarucaad kasamee fasalka cunugaaga.
- Ukaxee cunugaaga baska ama iskuulka.
- Kala shaqee cunugaaga shaqa gurigiisa.



PHOTO | EMILY SENAKER